

## Wixii dhacdo degdeg ah soo wac 999

Ha u isticmaalin sabab walba.

### Soo wicida 999

Ihaddii aad u baahantahay Guutada Dabdamiska, Booliska ama Ambalanska waa innaad soo wacda 999. Dhammaan wicitaanka oo dhamaa waa bilaash. Waad ka waci kartaa telefoon kasta, oo ay ka midyihiin telefoonada gacanta.

Ha wicin 999 ilaa ay xaaladu degdeg tahay. Dhammaan wicitaanka 999 waa la duubaa oo waxaad jabinaysaa sharciga haddii aad si ciyaar ah u wacdo.

Marka uu khadku kuu baxo, qofka haga telefoonadu wuxuu ku waydiin doon gargaarka degdega ah ee aad doonayso: guutada dab-damiska, Booliska ama ambalaanska. Fadlan si feejigan u dhagayso oo samir yeelo.

Ka dib waxa lagu gudbinayaa qof hage ka ah qolka adeega hawlgalada degdega ah ee aad doonayso. Waxay ku waydiin doonaan dhowr su'aalood oo kala duwan. Uga jawaab su'aalahaas si fiican, telefoonkana ha xidhin ilaa lagu sheego sidaas.

Haddii aadan ku hadal luqada Ingriisida, waxaanu kugu la talinaynaa inaad tabobar ku samaysid sida loo yidhaahdo cinwaankaaga isticmaal khadka guriga kaasoo noo soo hagaya gurigaaga.

## Su'aalaha guud iyo wixii gargaar ah ee aan deddega ahayn

London Fire Brigade  
169 Union Street, London SE1 0LL

**T** 020 8555 1200

**E** [info@london-fire.gov.uk](mailto:info@london-fire.gov.uk)

(adeegu wuxuu jiraa:

Isiniin ilaa Jimce 8 subaxii ilaa 5 galabtii)

Waxa qudha oo aanu ka jawaabi karaa wicitaanka lagu hadlay luqada Ingriisida oo qudha; Haddii aanu helo warqad ama email ku qoran luqad ajanib ah waanu tarujumi doonaa oo waxaanu jawaabta kusoo cilin doonaa isla luqadii ay ahayd.